

CUSUB

SHURUUDAHA

TAYADA QALIN JABINTA


Maadaama qalin jabintaada ay dhawdahay, waxaan doonaynaa in shaahadada dugsiga sare ee aad kaqaadato DPS ay kadhigantahay inaad diyaar utahay kaguul gaarista jiha kasta ood doorato nolosha — haday jihadaasi tahay shaqo aad biloowdo Qalin jabinta kadib, tababar dheeraad ah ood ugasho shahaadooyinka xirfado warshadeed ama hadaad aadayso kuleejka. Anagoo kubilaabayna sanad dugsiyeedkeena 2021 iyo sanad kasta oo laqalin jabinaayo mudadaas kadib, waxaan yeelanaynaa shuruudaha qalinjabin oo cusub. **Waxaa jiro sadex qaybood:**


**QORSHAHA XIRFADAHA SHAQSIGA
AH IYO KUWA AQQONTA (ICAP)**

SHAQADA KOORSADA

KARTIDA

Maxay kadhigantahay in la muujiyo karti?

Waxay kadhigantahay inaad awoodo muujinta inaad baratay xirfado iyo fikrado, aadna diyaar utahay inaad aduunyada la jaanqaado. Kaliya mafahmaysid fikrad ama xirfad, ee waxaad sidoo kale awoodaa inaad wax kadhhaliso aqoontaad baratay, aadna xataa kalsooni kuqabto inaad dadka kale usharaxdo.

Markasta ood kuleej kubiirto ama shaqo doonato, waxaa lagaa dalbanayaa inaad cadayso waxaad taqaano, marka ka DPS ahaan xirfadaas xili hore ayaan siibaranaa.

**XILI
HORE
BILOOW!**

74%

**DHAMAAN
SHAQOYINKA
GOBALKA
COLORADO
SANADKA 2020
WAXAY UBAAHAN
DOONAAN AQQON
KABADAN TAN
DUGSIGA SARE.**

**SIDA KULEEJ, DUGSIGA
GANACSIGA, TABABAR
AMA ADEEGGA
CIIDANKA**

Maxay muhiimka utahay?

Gobalka Colorado, 53% ardayda dhigata kuleejyada labada sano ah iyo 20% ardayda dhigata kuleejyada afarta sano ah diyaar uma ahan kuleejka markay kubiirayaan. Waa inay qaataan fasalo dheeri ah si ay ula qabsadaan, taasoo macnaheedu yahay inay mudo badan ku qaadato inay qalin jabiyaan lacag badan kubixiyaan kuleejyada.

Sharuudaheena Qalin jabinta ee cusub ayaa ah in aan xaqiijino in ardaydu diyaar uyihiin kuleejka iyo shaqooyinka dugsiga sare kadib. Waxaan doonaynaa inaad dareento inaad diyaar utahay aadna kukalsoontahay mustaqbalkaaga!

MA OGTAHAY?

Aoon dheeraad ah waxay kadhigantahay fursado shaqo oo dheeraad ah, taasoo macnaheedu yahay inaad lacag badan samayn karto.



**MUSHAARKA
CAADIGA AH**

\$11,667

DADKA DUGSIGA SARE KABAXA

KASOO HORJEEDA

\$62,609

KAQALIN JABINTA KULEEJKA



HERKA SHAQO LA'AANTA

27%

DADKA DUGSIGA SARE KABAXA

KASOO HORJEEDA

5%

KAQALIN JABINTA KULEEJKA

Sidee ayaan kumuujin karaa karti?

Si aad uga qalin jabiso dugsiyada DPS, arday kasta waa inuu muujiyaa kartidiisa dhanka afka Ingiriisiga, xisaabta iyo/ama udiyaar ahaanshaha xirfada asagoo dhamaystiraaya hal ama kabadan waxyaabood oo kamid ah dookhyada karti muujinta (waxay kuqoranyihiin dhabarka danbe ee bogaan).

Waxaa jira qaabab badan oo lagu muujin karo waxaad dugsiga kabaratay, taasoo ah sababta aan usamaynay dookhyada kaladuwan si ardaydu karti ugu yeeshaan Ingiriisiga, Xisaabta iyo udiyaar garoowga xirfadaha.



**WAXAAD KALADOORAN KARTAA
DOOKHYADA KARTIDA EE
FARAHA BADAN.**

KAFIIRI BOGGA XIGGA FAAHFAAFINTA.

Iikala qaybi. Waa maxay dookhyada aan haysto?

Waxaan kugua talinaynaa inaad hoos uqasho dookhyada badan aadna markaas kadoorato kan ku anfacaya adigga. Si guud, cabirada udiyaar ahaanshaha kuleejka sida ACT, SAT iyo Accuplacer ayaa kusamaysan heerar ay dajiyeen kuleejyada Colorado iyo jaamacadaha, hase yeeshee, kuleej kasta ama jaamacad asta waxay lahaan kartaa shuruudo diiwaangalin oo ugar ah, sidaas awgeed waa muhiim in ardayda iyo waalidiintu kala shaqeeyaan wakiilada dugsiyada iyo shaqaalaha kale ee dugsiga si ay ufahmaan shuruudaha garka ah.



SUAALO MIYAAD QABTAA?
Lahadal lataliyahaaga, macalinka ama maamulaha dugsigaaga.

DOOKHYADA MUJINTA KARTIDA EE SHURUUDAHA QALINJABINTA

DARAJADA tayada aqoonta af Ingiriisiga

DARAJADA tayada Aqoonta Xisaabta

Accuplacer

Ayadoo kumbuyuutarka lagu qaato, Accuplacer waa imtixaano dookhyo badan leh kaasoo lagu imtixaano aqoonta ardayga eexisaabta, akhriska, qorista iyo kumbuyuutarka si loo xaqiijio inay kubiiraan fasalka kuleejka ee kuhaboon xirfadahooda. Accuplacer waa imtixaano wax baaris ah oo lagu fiirsho tayada ardayda, maadaama lagu muujinaayo sawirka guud ee awoodahooda dhanka aqoonta iyo waxyaabaha ay kuliitaan.

Darajada ugu hosaysa ee macquulka ah oo imtixaanka laga keeni karo ay ah 20 daajada macquulka ah ee ugu saraysana waa 120.

Ogsoonow: Qiimaynta Accuplacer iyo cabirka darajo bixinta way isbadali doonaan kadib sanadka 2018.

95
XIRFADAH
JUMLAD DHISIDA

61
AQOONTA
XISAABTA
ALGEBRAHA
AASAASIGA AH

ACT (Imtixaanka Kuleejka ee Maraykanka)

ACT waa imtixaanka kuleejka lagu galonoo heer qaran ah kaasoo lagu imtixaano afar maado: Ingiriiska, akhriska, xisaabta iyo sayniska.

Darajada macquulka ah ee ugu saraysa maado kasta waa 36.

18

19

Imtixaanada Meelaynta Heerka sare ah (AP)

Cahsarada Meelaynta Dheeriga ah (AP) waa casharo heer kuleej ah oo lagugu barayoo intaad dugsiga sare dhiganayso. Marka uu simistarku dhamaado, ardayda waxaa lagula talinayaa inay qaataan imtixaanka AP, kaasoo lagu tijaabinaayo darajada ay kakeeni karaan heerka kuleejka.

Darajooyinku waxay udhaxeeyaan 1 ilaa 5. Haddii arday keeno darajada 2 kadib markuu imtixaankaas galo, wuxuu helayaa kartida uqalmida kuleejka. Inta badan kuleejydu waxay aqbalaan darajooyinka imtixaanka ee dhan 3 ama kasii bada.

2

2

Isdiiwaangelinta Socoto

Isdiiwaangelinta Socoto AYAA USAHLAYSA ARDAYDA INAY SI TARTIIB AH KUHELAAN DARAJOOYINKA DUGSIGA SARE IYO KULEEJKA. Ardayda ayaa awooda inay iskaqoraan korsooyinka kuleejka si lacag la'aan ah, taasoo ubadbaadinaysa waqti iyo lacag labadaba.

Ayadoo laga heli karo dhamaan dugsiyada sare ee DPS, iyo sidoo kale dugsiga laga doorto kuwa charterka ah, qaar badan oo kamid Buundooyink isdiiwaangelinta Socoto ayaa loowareejin karaa labo ama afar sano barnaamij ah oo degree lagu qaadanaayo.

C-
MA KASII BADAN
OO LAGA KEENO
MAADOOYINKA
LAGAA RABO

C-
MA KASII BADAN
OO LAGA KEENO
MAADOOYINKA
LAGAA RABO

DPS Capstone

Markaad haysato dookha Capstone, ardaydu waxay dhisayaan mansabka shaqada inay dhiganayaan dugsiga sare oo dhan si ay umuujiyaan waxay bardeen iyo sida ay saamaynta ugu leedahay nolosha dhabta ah. Waxay usahaysaa ardayda iyo macalimiinta inay lasocdaan hormar ay sameeyaan intii mudo ah, ardayduna helaan jawaab qiimo leh oo ku aadan shaqdooda markay mansabkooda dhisaan.

Ardayda doorta Mansab abuurida Capstone si ay ubuuxshaan shuruudaha karti abuurista, dugsiyada ayaa ardayda kacaawinaaya lasocshada hormarka ay sameeyaan.

**TIROOYINKA AY DPS
AQOONSAN TAHAY**

International Baccalaureate (IB)

Dugsiyada IB da waxay diirada saaraan yoolal heer caalami ah oo dhanka waxbarashada iyo waxbarida ah, ayagoo ardayda kataageeraya barashada si buuxda dhaqankooda iyo luuqadooda. Barnaamijyada IB du waxay gacan kagayntaan kobcinta garaadka, shaqsiyada, dareenka iyo wacyiga busho oo ardayda udiyaarinaaya inay guul kakeenaan aduunyada sida xawliga leh [ukoc=bcaysa](#).

Ardayda kadiiwaangashan barnaamijka Diplomada IB ga ayaa maraaya imtixaano lag tijaabinaayo kartidooda. Marka laga reebo buuxinta shuruudaha kartida, ardaydu waxay sidoo kale buundooyin ama darajooyin dheeri ah kahelayn inta badan kuleejyada iyo jaamacadaha Maraykanka.

4

4

SAT (Imtixaanka Heerka Aqoonta)

Mtixaanka SAT wuxuu tusinayaa kuleejyada sida aad diyaarka ugu tahay kuleejka ayagoo hubinaaya xirfadaha aasaasiga ah ee xisaabaadka, akhriska cadaynta wata iyo wax qorista, iyo qoraal ikhtiyaari ah.

Waxaa lagu cabiraa 200 ilaa 800 oo cabir buundo, ayadoo darajada "ugu saraysa" tahay 1,600.

Imtixaanka SAT waxaa laqaadaa todobo jeer sanad kasta. DPS ayaa imtixaanka uqabata markasta Bisha April si lacag la'aan ah ardayda fasalada hoose ee dugsiga sare. DPS ayaa sidoo kale bixisa barnaamij barashada SAT ah oo oonleen ah lacag la'aana ah ayadoo soo marisay Machdka Khan.

470

500

Shahaadada Udiyaar Goroowga Xirfadahee Heer qaran ee ACT WorkKeys

ACT WorkKeys waa qiimayn lagu imtixaano xirfadaha shaqo ee ardayda ee dhinacyada akhriska, qorista, xisaabaadka iyo xirfadaha qarnigaan 21 kuhaboon. Darajooyinka waxaa lagu saleeyaa xirfadaha dhanka shaqada kuwaasoo kacaawiya dadka wax shaqaalaysiia inay doortaan, shaqaalaysiayaan, tababaraan, kobciyaan ayna shaqada kuhyaan shaqaale dadaal badan leh.

BRONZE AMA KASII KOR

ASVAB (Aqoontada Tababarada Dhanka Adeegyada Ciidanka)

ASVAB waa imtixaano casri ah kaasoo dhaqan ahaan gacan kagaysta go'aaminta in ardaygu uqalmo xirfadaha ciidanka militriga; hase yeeshee, qiimayntu waa dookh ufuran ardayda xataa hadaysan dooran inay ciidanka xooga kubiiraan.

ASVAB waxaa lagu ogaadaa wax sababaynta dhanka tirada, aqoonta erayga, fahanka nuqulada qoraalka iyo cilmiga xisabta.

31 (ISKUDHAF)



Xili hore bilow!

Hadda weeye xiliga aad bilaabi lahayd raadinta barnaamijyada dugsigaaga kuwaasoo kaacaawin doona inaad buuxiso shuruudaha kartida ee dhinacyada Ingiriiska, xisaabta iyo udiyaar garoowga xirfadaha. Wixii macluumaad dheeri ah, kala hadal wakiilka dugsigaaga booqana bogga

www.collegeandcareer.dpsk12.org.

